# Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

**WARSAXAAFADEED 022/2009**

**Ergayga Gaarka ah oo soo dhaweeyey shirka koowaad ee Guddida Wadajirka ee Arrimaha Nabadgelyada uu ku yeeshay Muqdisho**

**Nairobi 27 July 2009 -** Ergayga Gaarka ah ee Qaramada Midoobey u Qaabilsan Arrimaha Somaaliya, Ahmedou Ould-Abdullah, wuxu soo dhaweeyey shirkii koowaad ee Guddidda Wadajirka ah ee Arrimaha Nabadgelyada ay ku qabteen Muqdisho taas oo uu arko talaabo muhiim ah dibna loogu hagaajinayo looguna horrumarinaayo arrimaha aminga ee Somaaliya.

Shirkaa oo la qabtay 25 July, 2009 waxa ka soo qaybgalay Wasiirada Arrimaha Gudahha, Gaashaandhigga, Nabadgelyada iyo Wakiilo ka socday AMISOM, Italy, EU da (Swedish Presidency), EC, iyo Wakiil ka socday Ergayga Sare ee Urrurka Midowga Yurub u qaabilsan Arrimaha loo wada dhanyahay ee Dibedda iyo Amniga iyo UNPOS.

Guddidda Wadajirka ee Arrimaha Nabadgelyadu waxa lagu dhisay heshiiskii Djibouti si looga wada hadalo arrimaha khuseeya ammaanka waxaana la isku raacay dhismaha Guddia iyo waajibaadkiisa shaqo si wax looga qabto xaaladda taagan. Xubnaha Guddiddu waxa ay hadda ka kooban yihiin shakhsiyaad muhiim ah oo ka tirsan xukuumadda, AMISOM, UNPOS iyo xubna kale oo ka tirsan bulshada caalamka oo ay ka mid yihiin Urrurka Jaamicadda Carabtu.

Ujeedada Guddiga loo aasaasay waxa ay tahay is-waafajinta hawsha xukuumadda iyo tan bulshada caalamka si uu gacan uga gaysto soo celinta xasiloonida iyo dhismaha hay'adaha nabadgelyada ee Soomaliya sida Ciidamada Qalabka sida iyo Booliska. Sidoo kale waxa hawshood ka mid ah qaybinta kaalmadii dhaqaale ee lagu balanqaaday shirkii deeq-bixiyeyaasha ee Brussels iyo isku-dubaridi tababarada.

"Guddidani waxa ay u fududeynaysaa xukuumadda Soomaaliyeed iyo bulshada caalamkaba jawi ay ku wada hadlaan ugana hawlgalaan sidii loo taageeri lahaa hay'adaha amniga wakhtigan xasaasiga ah". Ayuu yidhi Ould-Abdullah.

Guddigu si joogta ah ayuu u kulmi doonaa waxaanu ugu danbayta qaabilsanaan doonaa isbedelka lagu samyn doono hay'adaha kale ee nabadgelyada qaabilsan iyo sidii loo dejin lahaa sharciga iyo kala danbaynta.

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano, Public Information Officers
UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)
Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133
Fadlan booqo: www.unpos.unmissions.org